# Hadii aad ku dhaawacanto daryeelka caafimaadka

– waxaad xaq u heli kartaa magdhow sida ku dhigan xeereka dhaawaca bukaan socodka

Patientförsäkringen LÖF

# Hadii aad ku dhaawacanto daryeelka caafimaadka

Hadii uu dhaawac kugu yimaado daryeelka caafimaadka waxaad xaq u heli kartaa magdhow sida ku dhigan xeerka dhaawaca bukaan socodka. Dhamaan maamulka degmooyinka iyo goboladda Iswiidhan waxay heshiis la saxeexdeen caymiska bukaan socodka ee Landstingens Ömsesidiga Försäkringsbolag (Patientförsäkringen LÖF). Sanad kasta waxa la soo wargaliyaa Patientförsäkringen LÖF ilaa 10 000 oo dhaawac bukaan socdka ah. Waxa la siiyaa magdhow ugu dhawaan 45 % inta dhaawac la soo wargaliyey ka mid ah.

Qoraalkan yari waxa uu ku siineyaa warbixin la soo fududeeyey oo ku sabsan caymiska bukaan socodka. Dhamaan baadhitaanka iyo qiimeynta waxa loogu sameeyaa sida waafaqsan xeerarka markaa shaqeynaaya iyo shuruudaha caymiska ee markaa shaqeynaaya.

Sida ku dhigan xeerka dhaawaca bukaan socodka waa in magdhowga laga gooska qaybta shakhsiga. Qaybta shakhsigu waa 5 % oo qiimaha saamiga saldhiga ah, taas oo sanada 2011 ah 2140 kronor.

Waa inaad soo wargaliso dhaawaca mudo saddex sano gudhood ah taas oo maalinta aad ogaatey laga bilaabaayo

- in dhaawacu xaqiiq ahaan wax muuqda yahey
- in dhaawacu uu ku xidhan yahey daaweyn iyo in magdhowga bukaansocodku suurtogal yahey.
- caymis bixiyahee ayaa dalabka magdhowga lagu hagaajinayaa

Waxa jira xadka wakhtiga ugu badan oo ah toban sano taas oo laga soo bilaabaayo marka dhaawaca la sababey.

## Maxuu caymisku ku shaqeynayaa?

### Hadii dhaawaca la baajin karaayey

Dhamaan daaweynta dhakhtarku waxay khatar u leedahey carqalado. Si dhaawaca laguugu magdhabo waa in ay suurto gal ahayd in la baajin karaayey.

### Dhaawaca qalabka

Hadii dhaawacaaga ay keentey cilad ku timid, ama qalad u isticmaalid, aalad, qalab ama hawl fududeeyaasha kale ee laga isticmaalo daryeelka caafimaadka iyo ilkaha waxaad xaq u leedahey xaq magdhow.

### Sheegitaanka cudurka oo lala habsaamo ama la qaldo

Hadii sheegitaanka cudurka lala habsaamo waxaad heli kartaa magdhow hadii habsanku keeno inaad ka sii daraato hadii cudurka marka hore la sheegi lahaa.

### Infekshan
Marka qaliin la sameeyo waxaa jirta khatar infekshanada ah. Magdhow waa la bixinayaa hadii aad jeermiska ka qaadey daryeelka iyo daaweynta awgeed. Haseyeeshee magdhow lama bixinaayo hadii ifekshanku uu ka yimid adiga bakteeriyadaada ama hadii lagaa daaweynayey xaalad cudur oo noloshaada halis ku ahaa.

### Shilka
Magdhow waa la bixinayaa hadii dhaawaca uu sababey shil ka yimid daryeelka caafimaadka iyo ilkaha, iyadoo safar caafimaad aad ku jirto ama dhaawac uu keeno goob caafimaad ama qalab. Caadiyen ma helaysid magdhow hadii aad tusaale ahaan aad kufto adigoo ku socda musqusha iyo wixii la mid ah.

### Daawo siin qalad ah
Hadii dhaawacu uu keeno iyadoo daawo qalad ah laguu qoro ama laguu siiyo si qaldan waxaad u heli kartaa xaq magdhow. Saameynta daawada laguu qorey si sax ah waxaad soo wargalineysaa Caymiska daawada (Läkemedelsförsäkringen).

## Maxaanu caymisku ku shaqeyneyn?
### Shilka gaadiidka iyo shilka shaqada
Hadii uu ku soo gaadhey shil baabuur waxay caymiska gaadiidku magdhow ka bixineyaan xataa dhaawaca ku soo gaadhey markii lagaa daaweynaayey dhaawaca shilka. Hadii dhaawac shaqadu ku soo gaadho waxaad marka hore la xidhiidheysaa caymiska AFA Försäkring iyo Trygghetsförsäkring vid arbetsskada (TFA).

### Daaweynta gaarka ah
Dhakhtarka gaarka u shaqeeya ee ilkaha ama dhakhtar aan la laheyn heshiis kontraag maamulka degmada iyo daryeelka waayeelka ee dawlada hooose, waxuu heshiis caymis bukaan socodka ah la galey shirkadaha caymisyada ee kale. Hadii aanad hubin shirkada caymiska ee aad la xidhiidheyso, waxaad macluumaadka ka heli kartaa daryeel bixiyahaaga.

### Dhaawaca walxaha
Khasaare ku yimaada waxaad adigu leedahey magdhow lagaana siinaayo. Tusaale ahaan waxa noqon kara in muraayadaadii indhahu ay jabtey, boorsadaadii lacagta lagaa xadey ama ilkahaad xidhaneysay ay lumeen.

### Su'aasha la dhaqanka
Su'aalaha la xidhiidha tusaale ahaan la dhaqanka ama hantida ay daryeelka caafimaadka iyo ilkahu leeyihiin kuma jiraan caymiska bukaan socodka. Su'aalahaa waxaad kala hadli kartaa gudiga kalsoonida bukaan socodka ee maamulka degmada ama gobolka.

## Wax yar oo caymiska bukaan socodka ku sabsan

### Waxaad heli kartaa magdhow

- dhaawacyo suurto gal ahaa in la baajiyo
- dhaawacyo ay keentey cilad ku timid, ama qalad u isticmaalid qalabka daaweynta
- dhaawac ay sababto sheegitaanka cudurka oo qalad/ama habsan ah
- hadii aad jeermiska ka qaadey daaweynta
- dhaawacyada shilalka qaar ka mid ah
- dhaawacyo ay sababto daawo siin qalad ah.

### Lagu ma siin karo magdhow

- hadii dhaawaca xili habsan ah la soo wargaliyey
- dhaawacyo ka hooseeyo qiimaha qaybta shakhsiga
- dhaawacyo ama carqalado la baajin kari waayey
- hadii infekshanka ay keentey bakteeriyadaadu ama hadii cudurka lagaa daaweynaaye uu ka khatarsanaa infekshanka
- hadii ay kaa soo gaadhey saameyn daawo si sax ah laguugu qorey
- dhaawa ku yimid daaweyn sax ah oo xaalad si toos ah nolosshaada ugu khatar ah.

# Sida loo soo wargaliyaa dhaawac

Foonka soo wargalinta waxaad ka heli kartaa bogayaga internedka ee www.patientforsakring.se. Waxaad kale oo aad ku dalban kartaa telefoonla 08-551 010 00. Adiga ayaa go'aan ka gaadhaaya inaad na soo wargaliso anaga. Foomku waxa kale oo uu yaalaa dhakhtarka, rugta caafimaadka ama ciyaadada daaweynta ilkaha. Waxa kale oo aad ka dalban kartaa gudiga kalsoonida bukaan socodka.

### Warbixin dheeraad ah

Warbixin dheeraad ah oo ku sabsan caymiska bukaan socodka waxaad ka helaysaa www.patientforsakring.se.

Patientförsäkringen LÖF
Box 17830
118 94 Stockholm
telefoonka: 08-551 010 00
fagaska: 08-551 011 90
emaylka: info@patientforsakring.se
bogga: www.patientforsakring.se

LÖF 1011 2011-01-01